# Adeegyada Laga Heli karo DVR

DVR waxaa ay bixisaa adeegyo kala duwan oo kugu caawinaya in aad u diyaargarowdo, in aad hesho, iyo in aad sii shaqayso. Adeegyada aad isticmaasho waxaa ay ku xiran yihiin baahiyadaada gaarka ah iyo duruufaha jira. DVR waxay ku siin kartaa macluumaadka loo baahan yahay si ay kuugu caawiso go'aaminta adeegyada aad u baahan tahay si aad u gaarto yoolkaaga shaqo. Kuwani waxaa ka mid ah:

**Adeegyada qiimeynta** ee lagu cabbirayo awoodahaaga, karaankaaga, xirfadaha shaqo, iyo waxyaabaha aad xiisayo ee kugu caawinaya xulashada yool shaqo iyo adeegyada DVR ee aad u baahan tahay si aad u gaarto yoolkaasi.



**Adeegyada qorsheynta dheefta** si laguugu caawiyo in aad fahamto sida ay shaqeyntu u saameyn karto dheefaha kaashka naafonimada ama caafimaadka (tusaale, Dakhliga Dammaanada Dheeraadka ah ama Caymiska Naafonimada ee Dammaanada Bulshada) ee aad qaadato.

**Adeegyada la-talinta iyo hagidda** ee lagu bixiyo geeddi-socodka baxnaaninta oo dhan si laguugu caawiyo in aad gaarto go'aanno wanaagsan oo ku saabsan sida loo gaaro yoolalkaaga.

**Adeegyada nolosha madax-bannaan** si laguugu caawiyo fahamka caqabadaha naafonimo ee kaa hor istaagga in aad shaqeyso. Kuwani waxaa ka mid ah, balse aan ku koobnayn:

- Tababarka is-daryeelidda
- Maaraynta lacagta
- Isticmaalidda gaadiidka dadweynaha

**Adeegyada tiknoolajiyadda gargaarka leh** si lagaaga caawiyo in meesha laga saaro caqabadaha wadahadalka iyo/ama kuwa jireed ee kaa joojin kara in aad hesho oo aad sii haysato shaqada aad doonayso. Kuwani waxaa ka mid noqon kara aaladaha gargaara maqalka, aragga, ama barnaamij kumbuyutar gaar ah. Waxaad la sahmin kartaa la-taliyahaaga sida tiknoolaiyadda ay kuugu caawin karto in aad gaarto yoolkaaga shaqo.



**Tababar ama waxbarasho** si lagaaga caawiyo dhisidda xirfadaha iyo ka soo bixidda shuruudaha loogu qalmo shaqada.

**Adeegyada meelaynta shaqo** si laguugu caawiyo in aad sii-wadato shaqo raadintaada, oo ay ka mid tahay:

- Gargaarka buuxinta arjiyada shaqada
- Samaynta qoraalka taariikhda waxqabadka iyo waxbarasho
- Ku-tababar-qaadashada xirfadaha waraysiga, iyo aqoonsashada hoggaaminta shaqo

## Hiigsiga

Beddelidda nolosha iyada oo lagu caawinaya shakhsiyaadka naafada ah in ay si buuxda uga qaybgalaan bulshooyinkooda iyada oo loo marayo shaqo macne ku fadhida.

## Himillada

Xirfadlayaal u go'ay in ay hoggaamiyaan hawsha baxnaanista xirfadeed, bixinta waayo-aragnimo gaar ah oo la siiyo macmiil kasta, waqti kasta.

## Qiyamka

- **Daahfurnaan** loo marayo wada-hadal cad, oo daacad ah oo lala yeesho macaamiisha, hawl-wadeennada, iyo la-hawlgalayaasha
- Ku dhaqmidda **Daacadnimo**, taageeridda anshaxa iyo qayimka xirfadeenna
- Dhiirrigelinta dhaqanka **Awoodsiinta** loogu talogalay macaamiisha iyo hawlwadeennada
- Horumarinta hab-dhaqannada baxnaaninta loo marayo **Hal-abuur**
- **Wada-shaqeyn** lala yeesho macaamiisha, hawlwadeennada, iyo la-hawlgalayaasha oo natiijo soosaara
- Waxaa naga go'an **Kala-duwanaansho**, **Sinnaan**, iyo **U-dhammaanshaha** dhammaan noocyadooda kala duwn si loo gaaro heersare


Division of Vocational Rehabilitation
Washington State Department
of Social and Health Services
PO Box 45340 • Olympia, WA 98504-5340
1-800-637-5627
Adeegga War-Gudbinta ee Washington: 711
dshs.wa.gov/dvr


Bixinta Adeegyada DVR Tan iyo 1933


Maaliyadaha Federaalka iyo Gobolka ayaa la adeegsadaa si loo bixiyo adeegyada DVR. Barnaamijka baxnaaninta xirfadeed (VR) wuxuu helaa qiyaastii boqolkiiba 78 oo ah maaliyadaha Federaalka iyo boqolkiiba 22 oo ah maaliyadaha Gobolka. Si aad u hesho macluumaad faahfaahsan oo ku saabsan xaddiga lacagaha maaliyadaha Federaalka ee barnaamijka, fadlan booqo https://rsa.ed.gov/programs.cfm?pc=basic-vr&sub=awards.



DSHS 22-827 SM (Rev. 1/20) Somali


# Adeegso Awoodahaaga



*Qaybta Baxnaaninta Xirfadeed*

Washington State Department of Social & Health Services

*Transforming lives*

# Miyay DVR sax kuu tahay?

## Ku Saabsan DVR

Qaybta DVR waa kheyraad ka jira gobolka oo dhan oo ku caawisa dadka naafada ah in ay u diyaar-garoobaan, helaan, ku negaadaan, ku kobcaan, ama in ay dib-u-helaan shaqo. DVR ayaa kala shaqeysa ururrada iyo ganacsiyada in ay abuuran fursado shaqo.

## Kumaa ayay u adeegtaa DVR

Dadka raadiya shaqo ammaan ah, oo macno leh balse naafanimadooda ay ka dhalan karto hal caqabad ama caqabado badan oo hor-istaagga gaaridda yool shaqo.

## DVR waxaa ay kugu caawin kartaa in aad shaqo tagto

Shaqaalaha DVR waxay kugu caawinayaan in aad hesho macluumaadka aad u baahan tahay si aad u gaarto go'aan wanaagsan oo ku saabsan:

- Nooca shaqada ee aad doonayso
- Tallaabooyinka loo baahan yahay si aad u gaarto yoolkaaga



Adigoo ka helaya taageero DVR, waxaad:

- Qaabaynaysaa oo aad sameynaysaa qorshe tallaabo-tallaabo ah si aad u gaarto yoolkaaga shaqo.

# Geeddi-socodka Baxnaaninta

## Codsiga



- DVR waxaa ay ku siin doontaa macluumaad ku saabsan adeegyada baxnaaninta xirfadeed.
- Waa in aad buuxisaa Codsiga DVR ka hor inta aysan adeegyadu bilaaban.
- Codsigaaga waxaa dib-u eegis ku sameyn doona la-taliyaha DVR si loo go'aamiyo haddi aad u-qalanto adeegyada DVR.

## U-qalmitaanka

Waxaad u-qalantaa adeegyada DVR haddii aad:

- Leedahay naafonimo jireed, dhimir, ama dareen oo keenaya caqabad shaqo;
- U baahan tahay adeegyada baxnaaninta xirfadeed si aad u hesho ama aad u sii joogto shaqo; iyo
- Si aad u awooddo in aad shaqeyso iyada oo sabab u ah helitaanka adeegyada DVR.

Kooxdaada la-talinta DVR waxaa ay ururinaysaa diiwaanno si ay u diiwaangeliso aqoonsigaaga, naafonimadaada, iyo xaalkaaga shaqada. Haddii aysan jirn wax diiwaano ah oo ku saabsan naafonimadaada, waxaad u baahan kartaa in aad dhammeyso baaritaanno caafimaad ama baaritaanno si aad u xaqiijiso ama u taageerto naafonimada.

## Liiska Sugitaanka

Haddii DVR aysan u adeegi karin shakhsi kasta ee u-qalma iyada oo sabab u ah xaddidaadyo maaliyadeed, waa in ay sameyso liis sugitaan oo loogu talagalay adeegyada. Sharci ahaan, DVR waa in ay kala horumarisaa mudnaanta adeegyada la siiyo shakhsiyaadka leh naafonimada ugu weyn.

Shakhsiyaadka waxaa laga xulan karaa liiska sugitaanka iyada oo lagu saleynayo muhiimadda naafonimadooda iyo taariikhda ay codsadeen adeegyada. La-taliyaha DVR wuxuu go'aamin doonaa muhiimadda naafanimada iyo qaybta mudnaanta wuxuunna kugu wargelinayaa go'aamintan sida qayb ka mid ah geeddi-socodka u-qalmitaanka.

## Qiimaynta Xirfadeed

Adiga iyo la-taliyahaaga DVR waxaad sahaminaysaan noocyada shaqooyinka u dhigma qiimeyntaada xirfadeed. Waxaad dib-u eegis ku sameyn doontaa:

- Awoodahaaga, kartidaada iyo waxyaabaha aad xiisayso;
- Taariikhdaada shaqo iyo xirfadahaaga; iyo
- Macluumaadka ku saabsan isbeddellada ka jira suuqa-shaqada ee deegaanka.

Ama waxaad buuxin kartaa:

- Waxyaabaha aad xiisayso iyo/ama imtixaannada shaqada; ama
- Isku-dayada shaqo.



## Qorshaha loogu talogalay Shaqada

La-taliyahaaga DVR wuxuu bixiyaa la-talin iyo hagid joogto ah si uu kaaga taageero sameynta Qorshahaaga Gaarka ah ee Shaqaaleynta (IPE). Kani waxaa ka mid ah:

- Xulashada yool shaqo;
- Bixinta tallaabooyinka iyo adeegyada aad u baahan tahay si aad u gaarto yoolkaaga shaqo; iyo
- Ka-shaqeynta waxqabadyada lagu bixiyay qorshahaaga. Kuwani waxaa ka mid ah:
  - Tababar iyo waxbarasho
  - Sameynta shaqo raadin
  - Baarista kheyraad iyo gudbinnada shaqada la xiriira
  - Tababarka shaqo-raadin
  - Farsamooyinka wareysigaaga iyo taariikhdaada waxqabad iyo shaqo
  - Gargaarka meelaynta-shaqada
  - Taageerada shaqo sii joogidda

## Si Guul Leh U Shaqeeya

- Ka-dib marka aad shaqo hesho, DVR ayaa waxaa ay joogteyn doontaa xiriirka ay kula leedahay ugu yaraan 90 maalmood si ay u hubsato shaqadu in ay tahay mid si wanaagsan kuugu habboon.
- Ka-dib 90 maalmood, haddii aad ku wanaagsan tahay shaqada oo aan loo baahnayn adeegyo kale, adiga iyo la-taliyaha DVR waxaad go'aamin doontaan marka la xirayo kiiskaaga.

## Ka Hor Shaqada

- Haddii aad u baahan tahay caawimaad ka-dib marka kiiskaaga la xiro oo aadna ku guulaysato in aad shaqeyso, DVR ayaa dib u furi karta kiiskaaga waxaa ayna ku siin kartaa gargaar lagugu caawinaya in aad shaqadaada sii haysato.
- Haddii aad lumiso shaqadaada, DVR waxaa ay mar kale kugu caawin kartaa codsashada adeegyada DVR waxaa ayna kugu caawin kartaa in aad hesho shaqo la mid ah.